Haninge kommun

Utbildningsförvaltningen

## Doorashada dugsiga, ka hor fasalka dugsiga xannaanada

Fasalka dugsiga xannaanadu waa qaab iskool oo gaarkiisa ah oo khasab ah laga billaabo xilli dugsiyeedka deyrta ee sanadka uu canuggu buuxinayo lix sano. Sidaas darteed waalidka uu canuggiisu lix sano buuxinayo sanad dugsiyeedka waa in uu iskool doorto.

**Fadlan la soco inaad diwaangaliso doorashadaada xataa hadii aad dooratay dugsiga halkaasoo ilmahaagu ku hayso meelaynta asaasiga ah.** Meelaynta asaasiga ah ee ilmahaagu waxay muuqan doontaa markaad gasho doorashada dugsiga.

**Haddii aad Haninge gudeheeda ka doorataan iskool kale oo ay degmadu leedahay** oo aan ahayn halka canugga asal ahaan lagu meeleeyay waa maamulaha iskoolka aad dooratay cidda go'aan ka gaareysa in boos la bixin karo iyo in kale. Waxaa dhici *karta* in iskool uusan aqbali karin dhammaan inta soo codsata iyadoo ay ugu wacantahay in uusan boos u hayn.

**Xorriyadda doorashada ee degmada Haninge waxay ku koobantahay oo keliya doorashada iskoolka**, ee kuma jirto doorashada fasalka, kooxda ama macallimiinta.

### *Xeerarka meeleynta*

Ugu horreynta waxaa la meeleynayaa carruurta, waaliddiintoodu doortaan iskoolka canuggu asal ahaan uu ku meeleysanyahay.

Haddii waalidku uu Haninge gudeheeda ka doorto iskool kale oo ay degmadu leedahay waxaa loo maaleynayaa si waafaqsan nidaamka kala mudnaanta ee soo socda;

1. Haddii canugga ay walaalo u dhigtaan dugsiga la codsaday.
2. U dhawaashada dugsiga la codsaday (laakin ka baxsan aagga uu canuggu ka tirsanyahay). Waxaa taas loola jeedaa waddada dhabta ah ee la maro, ee maaha masaafada tooska ah.

### *Labadaba waalidka masuulka ah ama masuulka(masuliyinta) mararka qaar waa inay ansixiyaan dugsiga*

Doorashada dugsigu waxay dhamaystirmi doontaa marka waalidka masuulka ah iyo masuulka kaleba ay xaqiijiyaan doorashada lagu sameeyay iyadoo loo marayo e-service.

### *Doorashada dugsiyada xorta ah ama ka baxsan Haninge)*

Haddii aad dooraneysaan dugsi xor ah isaga ayaad toos ugu dirsaneysaan codsiga maxaa yeelay wuxuu leeyahay nidaam safeed oo u gooni ah. Waa dugsiga codsigaaga qabtaa kan go'aan ka gaaraya in boos la siinayo canuggaaga iyo in kale.

Hadii aanad hubin helitaanka goobta codsigaaga dugsiga madaxa banaan, waa inaad samaysaa doorashada koowaad ee dugsiga (iyo suurogalnimada doorashada labaad) ee mid kamid ah dugsiyada degmada Hanings. Kiiskaas waxaad diidi kartaa mar dambe goobta lagu siiyay.

Hadii aad heshay xaqiijinta meelaynta dugsiga madaxa banaan ee dugsiga oo aad aqbasho, waa inaad isdiwaangaliso qaybta doorashada dugsiga oo aad diido inaad ka qaybqaadato doorashada dugsiga iyo xaalada lagu siiyay ee goobta . (Macluumaadku waxa uu u baahan yahay la socodka dugsiga aasaasiga ah iyo in foojarka dugsigu tago dugsiga saxda ah.)

### *Doorashada dugsi degmo oo degmo kale ku yaal*

Haddii aad rabtaan in aad boos ka heshaan dugsi degmo oo ka baxsan Haninge, waxaa codsiga si toos ah loogu dirayaa dugsigaas. Waa dugsiga codsigiinna qabtay cidda go'aan ka gaareysa in boos la siinayo canuggiinna iyo in kale.

Hadii aand hubin inaad hesho helitaanka goobta dugsiga/codsiga dagmada, waa inaad marka samaysaa doorashadaada koowaad ee dugsiga (iyo haday suuro galtahay doorashada labaad) ee mid kamid ah/waxoogaa dugsiyada dagmada Hanning.

Hadii aad heshay xaqiijinta meelaynta ee katimid dugsiga degmada ka baxsan Haninge iyo aqbalaadiisa, waa inaad iska diwaangalisaa qaybta doorashada ee dugsiga iyo diidista kaqaybqaadashada doorashada dugsiga oo sheeg dugsiga lagaa ogalaaday (Macluumaadku waxa uu u baahan yahay la socodka dugsiga aasaasiga ah iyo in foojarka dugsigu tago dugsiga saxda ah.)

***Fiiro u lahaada in degmada Haninge aysan mas'uul ka ahayn isu qaadashada dugsiyada xorta ah ama iskool degmo kale ku yaal!***

### *Afka hooyo*

Ardayda af hooyo ahaan ugu hadasha af kale oo aan swiidhish ahayn, kuwaas oo afka hooyo uu yahay mid maalin walba guriga looga hadlo, waxay xaq u leeyihiin in loo dhigo afka hooyo. Afka hooyo waxaad ku codsaneysaa foom-codsi oo gaar ah oo ku jira bogga haninge.se/forskola-och-skola/modersmal/

### *Iskool isu qaadis*

Ardayda codsata iskoollada kale ee aan ahayn iskoolladi asal ahaan lagu meeleeyay iyaga, fursadahooda ku aaddan in loo oggolaado in iskoollada loo qaado wey xaddidanyihiin. Ardayga xaqa u leh in loo qaado dugsiga asal ahaan lagu meeleeyay xaq wuu u yeelan karaa in iskoolki uu doorto loo qaado haddii safarka uu ku tegayo iskoolka uu doortay uusan ka dhigneyn kharash dheeraad ah oo degmada ku soo kordha marka la barbar dhigo kharashka uu ku kici lahaa haddii loo qaado dugsigi asal ahaan lagu meeleeyay.

Qaaditaanka waxaa loola jeedaa safarrada gaadiidka dad weynaha (kaarka SL) iyo gaadiid wax qaado oo si gaar ah gorgortan loola galay (bas iskool, taksi iskool, doon).

Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa barta intarneetka ee degmada:
https://www.haninge.se/forskola-och-skola/skolskjuts-och-sl-kort/

### *Maareynta macluumaadka shakhsiga ah*

Marka aad iskool boos ka codsaneysid waxaan macluumaadkaaga maareyneynaa iyadoo ay ulajeeddadeennu tahay in aan meeleynta go'aan ka gaarno. Waxaan macluumaadkaaga maareyneynaa annagoo kaashaneyna qodobka 6-aad ee) xeerka ilaalinta macluumaadka ee Midowga Yurub. (Maareyntu waa lagama maarmaan si loo qabto hawl-dan-guud ama waa qeyb ka mid ah hawlaha fulinta dowladnimada ee mas'uulka macluumaadka shakhsiga ah.

Mas'uulka macluumaadka shakhsiga ah waa guddiga dugsiga hoose dhexe- iyo dugsiyada xannaanada.

Wax dheeraad ah oo ku aaddan sida aan u maareyneyno macluumaadka shakhsiga ah ka akhriso bogga intarneetka ee https://www.haninge.se/personuppgifter

## Hagaha tixraaca degdega ee doorashada dugsiga, Haninge kommun (Dawlada)

Ku gal adeega intarnadka Aqoonsiga Bangigaaga (BankId).
Guji cunuga la rabo. Haddii aanu magacu muuqan, guji Bogayga (Min sida) oo dooro Adeegayga (Mina ärenden)




Halkan waxaad ka dooran kartaa:

- **Aqbal (Tacka Ja)** – waxaad ka aqbalaysaa aqbalida dugsiga ee cunuga loo qoondeeyey
- **Dugsiga kale ee deegaanka Haninge (Annan kommunal skola i Haninge)** – halkan waxaad ka dooranaysaa dugsiga deegaankale Haninge
- **Diid (Tacka nej)** –diidmada aad sameysid haddii cunugu helay xaqiijin aqbalaad, tusaale, dugsi madaxbanaan

**Aqbal (Tacka Ja)**

Haddii aad **Aqbashid (Tacka Ja) –** ka bilow adoo buuxinaya faahfaahinta lagaalasoo xidhiidhayo. Ka jawaab su'aalkasta, tusaale ahaan doorashada luuqada. Guji **Siiwad (Gå vidare).** Xaqiiji codsiga – marka dhamaan macluumaadku sax yahay, guji **Xaqiiji codsiga (Bekräfta ansökan).**

**Dugsi kale oo deegaanka Haninge (Annan kommunal skola i Haninge)**
Hoos u deg si aad u heshid dugsiyada kale ee deegaanka ee adiga ama cunugaagu rabo inuu codsado. Guji **Kudar (Lägg till)** si aad u calaamadisid dugsiyadan.




Waxaad codsan kartaa ugu badnaan labo dugsi. Haddii aad ka heshid diidmo dugsiyadan markaas dugsigaaga asaasiga ah ayaa noqonaya doorashada u danbaysa. Hoos u deg oo guji **Siiwad (Gå vidare)**.
Buuxi macluumaadka lagaalasoo xidhiidhayo oo guji **Siiwad (Gå vidare)**.

Ka dooroikhtiyaarada hoose si aad u dooratid ikhtiyaarada aad rabtid. Haddii uu jiro dookh kale, guji Kudar dookh kale si aad ugu noqotid dugsiye kale oo khasaba.




Guji **Siiwad** markaad sameysid doorashooyinkaaga.
Hubi in dhamaan macluumaadku sax yahay oo ka dib xaqiiji codsiga.

## Diid (Tacka nej)

Haddii cunug meel looga qoondeeyey dugsi deegaankale ama dugsi madaxbanaan waad diidaysaa waxaanad dooranaysaa meesha cunugaaga dugsi kale looga qoondeeyey, ka dib guji **Diid (Tacka nej)**




Waalidka koobaad ayaa doortay oo si ay sax u noqoto, waalidka labaad waa inuu xaqiijiyaa dugsiga la doortay.

**Waalidka kale**
Ku gal adeega intarnadka Aqoonsiga Bangigaaga (BankID)
Guji cunuga la rabo. Haddii aanu magacu muuqan, guji Bogayga (Min sida) oo dooro Adeegayga (Mina ärenden).




Ka bilow adoo buuxinay macluumadka lagaalasoo xidhiidhayo. Guji **Siiwad**

Macluumaadku imika wuxuu muujinayaa sida mid ka mida waalidku u doortay dugsiga. Waxay

- **Aqbaleen** – waxaad ka aqbalaysaa aqbalida dugsiga ee cunuga loo qoondeeyey
- **Dugsiga kale ee deegaanka Haninge** – halkan waxaad ka dooranaysaa dugsiga deegaankale Haninge
- **Diideen** –diidmada aad sameysid haddii cunugu helay xaqiijin aqbalaad, tusaale, dugsi madaxbanaan

Mid ka mida waalidka ayaa **Aqbalay** dugsiga khasabka ee asaasiga ah**.** Haddii aad ku raacdid doorashada, waxaad dooranaysaa **Aqbal**. Haddii aanad ku raacin, guji **Diid**, lakiin nidaamka doorashda dugsiga waa in la sameeyo markale markaad labadiinu isku raacdaan.




Si aad uga noqotid nidaamka doorashada dugsiga, ka dooro badhanka **Bogayga** – **Adeegayga** oo ka noqo dugsiga la doortay adoo gujinaya **Muuji Dugsiga la Doortay (Visa skolvalet).** Hoos u deg oo **Ka saar dugsiga la dhameystiray (Ta bort genomfört skolval)**

Hal waalid ayaa sameeyey doorashadiisii **Dugsi deegaankale Haninge.** Haddii aad ku raacdid doorashada, waxaad dooranaysaa **Aqbal**. Haddii aanad ku raacin, guji **Diid**, lakiin nidaamka doorashda dugsiga waa in la sameeyo markale markaad labadiinu isku raacdaan.




Si aad uga noqotid nidaamka doorashada dugsiga, ka dooro badhanka **Bogayga** – **Adeegayga** oo ka noqo dugsiga la doortay adoo gujinaya **Muuji Dugsiga la Doortay.** Hoos u deg oo **Ka saar dugsiga la dhameystiray.**

Mid ka mida waalidka ayaa **Diiday.** Cunuga hadaba waa in laga sameeyey meel dugsi deegaan kale ama madaxbanaan. Haddii aad ku raacdid doorashada, waxaad dooranaysaa **Aqbal**. Haddii aanad ku raacin, guji **Diid**, lakiin nidaamka doorashda dugsiga waa in la sameeyo markale markaad labadiinu isku raacdaan.




Si aad uga noqotid nidaamka doorashada dugsiga, ka dooro badhanka **Bogayga** – **Adeegayga** oo ka noqo dugsiga la doortay adoo gujinaya **Muuji Dugsiga la Doortay.** Hoos u deg oo **Ka saar dugsiga la dhameystiray.**